# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1038
# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# 2:3-8

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maata nool, ayaa waxaa rasuuul Butros leeyahay, sida ku qoran isla Warqaddan kowaad cutubka 2:1-2, baalka 405 ee Axdiga Cusub, sidatan: **"Haddaba, sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan, iyo khiyaano oo dhan, iyo laba-wejiilenimo, iyo xaasidnimo, iyo cay oo dhan, oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa**

**ee saafiga ah, si aad ugu kortaan xagga badbaadada."**
**SONG: REEL----CUT--------**

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhegaystayaal faalladii aynu ka bixinaynay labadii aayadood ee ugu horreeyey cutubkan labaad. Waxaanan idiin sheegnay isla sida ilmaha yaryari ay caanaha u jecle yihiin, in innana aynu Hadallada Ilaah u jeclaanno. Waxaana taasu keenaysaa kororsiimo xagga ruuxa ah, oo ugu dambaynta keenaysa inaynu ku korno nimada iyo aqoonta Sayid Ciise Masiix.

Haddab la arki maayo nolol-masiixinnimo oo taabbagal ah haddaan la jeclaysan caahana Ruuxa ee saafiga ah, si aynu ugu korno xagga badbaadada. Waa inaynu xusuusanno in dhallaanka yar yo qofka weyn labaduba ay yihiin aadami, laakiin waxaa kala duwan heerka koritaankooda. Dhallaanku wuxuu u baahan yahay caano si uu ku tabargalo.

Imminka, sidee baa qofka Masiixiga ah ku korayaa. Waxaan idiin sheegayaa inaan la arkaynin koritaan haddaan la laasimanin barashada qawlka Ilaah. koritaanku wuxuu ka yimaadaa barashada Hadallada Ilaah iyo in lagu camal-falo ama ay noloshayada ka muuqdaan. Haddaba waxaa jira kuwo badan oo xagga ruuxa weli caruur ka ah, waxaanay u baahan yihiin caano aad iyo aad u fara badan si ay ugu koraan nimcada Masiixa.

Markii qofku helo caanaha uu u baahan yahay waxaa uu gaarayaa heer aanu u baahanin wadaadkiisa, laakiinse uu isagu iska taxaddaro. Waxaana u soconaya koritaanka Ruuxa, inta ay xiisaha u qabaan caanaha saafiga ah ee Ruuxa oo ah Injiilka Masiixa ama Hadallda Ilaah guud ahaan. Marka la leeyahay

caanaha Ruuxa ee saafiga ah looma jeedo aayado hadba meel laga soo qaaday Waxase loo jeeda kitaakba qoduuska ah oo dhan. Waa in qofku daraasaad ku sameeyo kitaabka, oo uu daraf ka bilaabo ilaa darafka kale. Barashada kitaabka qoduuska ah waa inay ka timaaddaa kitaabka oo loo baranayo kutub kutub. Waxaana halkaas ka soo baxaya cunno isku dheelli tiran ee ruuxeennu jeclaysanayo. Waa haddii aynu baranno kitaabka oo dhan laakiin aynaan teel teel u baranin.

Waxaana ugu dambaynta la soo baxaysaa hadallo wax ku ool ah oo u roon nafsadda, waxaana kobcaya garadkaaga, waxaa kaloo is-dhimaya dabiicadihii hore ee nolosha. Wax waliba waxaad ku samaynaysaa xigmad iyo xasiloonaan iyo daacadnimo, waayo waxaa ruuxaagu helay nafaqadii ruux ahaaneed ee uu kaga baahnaa Hadallda Ilaah. Haddaan faallidii aayadihii 1-2 intaas ku soo ekayno ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa isla cutubkan 2:3, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Haddii aad dhadhamiseen in Rabbigu raxmad leeyahay..."** Weli jumladu ma dhammaystrina waxayse soo dhamaystirmaysaa marka la gaaro aayadda 4aad. Waxaana rasuulku leeyahay, **"Haddii aad dhadhamiseen in Rabbigu raxmad leeyahay'**, waxana uu ula jeedaa markii qofku badbaado, ayaa qofku yeelanayaa han weyn uu u qabo Hadallada Ilaah isla sida dhallaanku markii uu dhasho uu ugu baahan yahay ama xiisoodo caanaha. Waa in la helo nidaam iyo qaab dadka lagu baro hadalldada Ilaah si ay kaga hriqadaan caanaha saafiga ah ee Ruuxa. Waxaanay garanayaan marka hore ee ay ruuxa ka dhashaan in Masiixu wanaagsan yahay.

Maxaa haddaba keenaya in laga dhaqaaqo waxyaalihii hore? Waxaa keenaya in la hor joogsado waxyaalaha jidhku doondoono. Masiixiyiin fara badan ayaa waxay dareensan yihiin inay ka dhaqaaqaan dhunida markii ay Masiixa soo raacaan. Markaa waa inaynu marka hore ogaanno inynu ku nool nahay duni silic iyo rafaad iyo wareer badan, waana inaynu garanno inaynu ku nool nahay dunida inkatoo aynaan ahayn kuwii dunida. Bal aan sharraxaad idinka siiyo fikirka khaldan ee dadku sida badan ay ka aaminaan kala dhaqaaqista dunidan.

Dadka qaarkii baa waxay kala dhaqaaqista dunida u macnaystaan inay ka fogaadaan meelaha khamriga lagu iibiyo. Kuwana waxay la noqonaysaa inay ka dheeraadaan kuwa qaadka cuna oo la doonayo inay ku wacdiyaan hadalka. Waxyaabahaas oo dhan maahan ama looma macnaysan karo kala dhaqaaqista dunida. Kala dhaqaaqis waxaa noqonaya in marka hore laga dhee raado, xanta, laba-wejiilenimada, xaasidnimada, xanta iyo wixii la mid ah.

Haddii aynu waxyaabahaas ka fogaanno, waxaan ka fogaanaynaa dunida. Ruuxa Ilaah ee inagu dhex jira ayaa wuxuu soo saarayaa kala dhaqaaqista. Haddaba ilamaa aniga iyo adigu aynu ka gudubno hadalka xun, laba-wejiilenimada, xaasidnimada iyo xumaanta mooyaane, ku kobci mayno nolosha masiixinnimada, waa tan Masiixa loo noolaanayo e.

Weli waxaannu horey idiinku sii wadaynaa cutubkii labaad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Butros, waxaanan idiin akhriyeynaa aayadda 4aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Kaas oo aad u imanaysaan, oo ah dhagax nool, oo**

**dadku diiday, laakiin xagga Ilaah laga doortay oo qaali ah."**

Waxaa rasuulku leeyahay isagoo haatan ka hadlaya Masiixa, **"Kaas oo aad u imanaysaan, oo dha dhaga nool."** Haddaba waxaynu noqonnay carruurta dhagaxa nool oo ah Masiixa. Kaddib markii Simoon Butros uu qiray kan Masiixu ahaa ayaa Ciise Masiix wuxuu leeyahay, sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 16:18, oo leh:

**"Anigu waxaan kugu leeyahay, Butros baad tahay, oo dhagaxan ayaan ka dul dhisan doonaa kiniisaddayda, oo albaabbadii Haadees kama adkaan doonaan."**

Haddaba ninkan la yiraahdo Simoon Butors wuxuu haatan inoo caddaynayaa in dhagaa nool uusan isaga ahayn laakiin uu yahay Ciise Masiix qudhiisa. Mar kale ayaa Ciise Masiix wuxuu hadalkiisa ku soo darayaa Butros sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 21:42, 44. Haddaan aayadahaas kore idiin akhrinno ayaannu ku hor-maraynaa aayadda 42aad waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markaasaa Ciise ku yidhi iyaga, Miyaanaydin weligiin Qorniinka ka akhriyin, Dhagaxii kuwa ax dhisaa ay diideen, Wuxuu noqday madaxa rukunka. Tanu xagga Rabbiga bay ka timid, Oo waa ku yaab inahayaga."**

Haddba Sayid Ciise Masiix wuxuu ka soo xigtay meeriska Sabuurka 118. Haddaba isaga oo iska hadlaya ayuu wuxuu leeyahaysida ku qoran aayadda 44aad: **"Oo kan dhagaxan ku dhacaa, wuu jejebi doonaa, oo kan uu ku dhoco, wuu burburin doonaa."** Haddaba Ciise Masiix waxaa weeye aasaaska dhagaxa kiniisadda. Weli Sayid Ciise Masiix waa isla aasaaska dhagxaanta

ama xubnaha kiniisadda. Innaga oo dhan waxaynu ku taagan nahay Masiixa awgii. Bawlos oo faahfaahin ka bixinaya umuurta ayaa wuxuu leeyahay isda ku qoran Warqaddiisii kowaad ee reer Korintos 3:11, baalka 294 ee Axdiga Cusub, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

**"Waayo, ninna ma dhigi karo aasaas kale kan la dhigay mooyaane oo ah Ciise Masiix."**

Hddaba haddii aad u timaaddo sida dembiile, oo aad dhagaxaas ku dhacdo, waad jejebaysaa. Habase yeeshee markii aad jajabto ayaa dhagaxaasu kuu noqonayaa celin, taasina waa badbaadadaada. Balse haddii aad diiddo dhagaxa, dhagaxa ka gudbi maysid. Nebi Daanyeel, ayaa wuxuu muuqaalladii la tusi jiray mid ka mid ah ku arkay, dhagax aan gacanu goynin, wuxuuna leeyahay haddaan soo xiganno kitaabkii Daanyeel 2:34 sidatan:

**"Oo waxaad aragtay ilaa uu dhagax aan gacmo lagu goyn ekaantii kaga dhacay cagihii ahaa birta iyo dhoobada, wayna kala burbureen."**

Haddaba dhagaxaasu waa mid xukun ah, kaasoo dhulka ku soo dhacaya, dhagaxaasina wuxuu calaamad u yahay Masiixa. Wuxuu kaloo noqonayaa dhagaxa ciqaabta u keenaya dunida. Waana sawirka halkan laynagu siinayo! Waxaa markaas halkan yaalla sheey cajiib ah. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka labaad ee warqaddan kowaad ayaannu imminkana idiin akhrinaynaa aayadda 5aad, baalka 406 ee Axdiga Cusub waxaana qorniinku leeyahay sidatan hoso ku xusan.

**"Idinkuna sida dhagaxyo nool-nool ayaa waxaa laydinka dhisayaa guri ruux ah inaad ahaataan**

**wadaaddo qoduus ah si aad xagga ruuxa uga bixisaan allabbariyo uu Ilaah ku aqbalo Ciise Masiix."**
Wuxuu rasuulku leeyahay: **"Sida dhagaxyo noolnool."** Wuxuuna ula jeedaa sida kuwo aan dhacaynin oo xoog leh, waayo, innaga mar kale laynaguma dhalin buur baaba'aya, laakiinse waxaa laynagu dhalay abuur aan baabayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo waara." Waxaa sidaas inoogu xaqiijiyey aayadda 23ad ee cutubka kowaad Rasuul Butros.
Waxaad markaas noqonaysaan sida dhagxaan ku taagan Ciise Masiix, kaasoo inagu leh waxaan kiniisaddayda ka dhisi doonaa dhagaxaas, isagoo ula jeeda rasuul Butros. Isagoo haddaba taas garanaya ayaa rasuul Butros wuxuu leeyahay: **"..Waxaa laydinka dhisayaa guri ruux ah."** Isla sidii Simoon Butros u ahaa mid ka mid ah dhagaxda ayaad adiguna u tahay, oo aniga qudhayduba waxaan ahay mid ka mid ah dhagaxdaas yar yar oo qaybta ka ah guriga ruux ahaaneed. Markii innagu aynu noqonno kuwo Ilaah ka cabsada, oo ah muuminiinta Ilaah, waxaynu qayb ka noqonaynaa dhismahan Ilaah.
haddii aynu dib ugu noqonno Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka reer Efesos 2:19-22 ayaa waxaa Qorniinku leeyahay sidatan:
**"Sidaas daraaddeed idinku mar dambe ma ihidin ajaanibyo iyo shisheeyayaal, laakiinse qoduusiintaad isku waddan tihiin, oo waxaad ka mid tihiin reerka Ilaah, oo waxaa laydinka dul dhisay aasaaska rasuullada iyo nebiyada, oo waxaa dhagaxii geeska ee ugu weynaa idiin ah Ciise Masiix qudhiisa."**
Maantadan Ilaah wuxuu dhisayaa guri, waana macbud

nool. Kuweenna isaga u imanaya oo garanaya inay dembiileyaal yihiin, oo ku soo dhacay, ayaa isaga ugu imanaya naxariis, waana layna badbaadiyey. Wuxuuna inaga dhigay qayb ka mid ah macbudka nool. Haddaba Ilaah wuxuu wax ka dhisayaa aasaaska Masiixa dushiisa. Wuxuuna rasuul Butros leeyahay:

**"...inaad ahaataan wadaaddo qoduus ah si aad xagga ruuxa uga bixisaan allabbariyo uu Ilaah ku aqbalo Ciise Masix."**

Haddaba sawir kale ee ay warqaddani ina siinayso innaga ayaa wuxuu yahay, wadaadnimo qoduus ah. Waxaana rumaystayaasha oo dhan ay noqonayaa xubno nool oo lagu tilmaamay sida dhagax nool ama waxay noqonayaa kakanayaal ama dad adadag. Waxaana rumaystayasha oo dhan lagu sheegay wadaaddo qoduus ah.

Kol dambe ayuu wuxuu oran doonaa rasuul Butros wadaaddada amiirnimada. Maddaama aynu nahay wadaaddo qoduus ah ayaa laynaga doonayaa inaynu Ilaah siinno allabbari xagga ruuxa ah oo Ilaah ku aqbalo Ciise Masiix. Waxaa mahad leh Ilaah inagu siiyyey allabbaryada xagga Ruuxa ah ee lagu aqbalayo Sayid Ciise Masiix.

Dad badan ayey la tahay in lacagtu aanay noqon karin allabaryada Ruuxa. Balse waay ku xiran tahay siad aad lacagta u isticmaasho. Waxaannu garanaynaa in innaga qudheenna aynu sida allabbari caraf-udgoon nafsaddeenna Ilaah ugu bixin karno, waxyaabahaas oo kale ayaa loo yaqaannaa allabbaryada Ruuxa. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 2aad ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda lixaad waxaana Qorniinka qoduuska ahi leeyahay dhegayste

sidatan:

**"Maxaa yeelay, Waxaa Qorniinku leeyahay, Bal eega, waxaan Siyoon dhex dhigayaa dhagax geeseed oo weyn, oo la doortay, oo qaali ah, Oo kii isaga rumaystaa ma ceeboobi doono."**

Haddaba qidcadaas wuxuu rasuulku ka soo xiganayaa kitaabkii Ishacyaah 28:16, oo haddaan waxyiga nebiga ku soo noqonno ayaa nebigu leeyahay, iyadoo uu ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah ka dul hadlayo, sidatan:

**"Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eega, Siyoon dhagax baan aasaas uga dhigay, waana dhagax la tijaabiyey, waana dhagaxa geeseed oo qaali ah oo aasaas la hubo ah, oo kii isaga rumaystaana ma deg-degi doono."**

Haddaba dhagaxaasu wuxuu tilmaamayaa Masiixa, oo waxaa lagu tilmaamaa in Masiixu yahay dhagax geeseed wax waliba dushiisa laga dhiso. Qorniinkana way ku caddahay in dhagaxaasu yahay Masiixa. Weli waxaannu ku jirnaa dhegaystayaal meeriska cutubka labaad ee Warqaddan kowaad ee rasuul Butros,

waxaanan imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 7aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Haddaba sidaas daraaddeed qaalinimada waxaa leh idinkoo ah kuwa rumaysan, laakiinse xagga kuwa aan rumaysnayn, Dhagaxii kuwa wax dhisa ay diideen, Wuxuu noqday madaxa rukunka."**

Wuxuu rasuulku leeyahay isagoo rajada hubaasha ah kala hadlaya masiixyiinta, "...sidaas daraaddeed qaalinimada waxaa leh idinkoo ah kuwa rumaysan." Turjumada dhabta ah waxay tahay, **"Kuwiinna rumaystay waxaad leedihiin qaalinnimada Masiixa."**

Haddaba Masiixu waa qaali, oo isaga oo kale la arki maayo.

Waxaase xiisa leh in nin kalluumaysata ah oo aan war u haynin dunida kale uu imminka ka hadlayo qaalinnimada Masiixa. Waxaa erayga qaalinimo aad u jecel dumarka. Haweenku waxay jecel yihiin inay soo iibsadaan dahab iyo qallin qaali ah iyo weliba fargashiyo habeennimada ifaya. Balse wax waliba ee rasuul Butros ka hadlo ee khuseeya Masiixa ama dhiiggiisa wuxuu isticmaalayaa erayga ama kalmadda qaalinimo.

Wuxuu rasuulku leeyahay, haddaan idiinku soo celiyo aayaddii 7aad, ee cutubkan labaad sidatan:

**"Haddaba sidaas daraaddeed qaalinimada waxaa leh idinkoo ah kuwa rumaysan, laakiinse xagga kuwa aan rumaysnayn, Dhagaxii kuwa wax dhisaa diideen, Wuxuu noqday mmadaxa rukunka."** Waxaan filayaa inaad garateen in rasuul Butros ka soo xigtay qidcadan Sabuurka 118:22. Weli meeriska cutubka 2aad ayaannu ku jirnaaye, aynu imminkana idiin akhrinno aayadda 8aad, waxaana waxaa qorniinku leeyahay sidatan:

**"Iyo Dhagax lagu turunturroodo oo ah dhadhaab lagu xumaado, waayo, waxay ku turunturroodaan hadalka, maxaa yeelay, ma addeecsana; taas oo ah wixii loo xugmay."**

Haddaba qidcadan waa mid ahmiyaddeedu sarrayso marka la eego Qorniinka. Waxaad xusuusataan in qidcadii hore laga soo xigtay kitaabka Sabuuradda 118:22. Aayaddii hore ee toddobaad haddaan ku yara noqonno, ayaa waxaa jiray qiso caan ah oo dhacday markii la dhisayey Macbudkii Yeruusaalem, markaasoo boqor Sulaymaan uu Yeruusaalem boqor ka ahaa.

Waxaana qisada dhismaha ay ku qoran tahay kitaabka boqorradii kowaad 6:7, waxaana qorniinku uu leeyahay sidatan:

**"Oo markii guriga la dhisayey waxaa lagu dhisay dhgaxan lagu soo diyaariyey meeshii laga soo qoday, oo intii guriga la dhisayay guriga dhexdiisa laguma maqlin dubbe ama faas ama alaab kale oo bir ah."**

Haddba dhismuhu wuxuu ku socday qiyaas iyo cabbiraad la cabbirayo dhagxaanta; waxaa markaa dhacday baa la leeyahay markii dhismihii billowday in dhagax waliba meeshiisii lagu aadiyey ama la geliyey.

Waxaa markaa ragga taariikhda qoraa ay aaminsan yihiin in bilowgii mashruua dhismaha macbudka, la keenay dhagax weyn, oo waxaa lala keenay dhagaxdii hore, laakiin meel la geliyo ma lahayn, markaasaa waxaa dhacday in raggii dhisayaasha ahaa ay yiraahdeen war dhagaxan weynanka badan naga tuura, ee ina siiya kuwan yar yar.

Markii ay sidaas yeeleen, dhagaxii waa layska tuuray, oo waxaa laga riday buurtii, ah yeeshee goortii dhismihii dhammaaday oo loo baahday dhagaxa xagga dusha ayey dhisayaashii is-weyddiiyeen waxa loo keeni la' yahay, markaasay farriin u direen kaawada, oo waay ku yiraahdeen maxaa dhagaxa rukunka loo keeini waayey.

Markaasay raggii kaawada joogay ku yiraahdeen war dhagaxii weynaa ee aan billowgiiba soo dirnay, miyaanu ahayn dhagaxa rukunka. Markaasay dhisayaashii grteen baa la leeyahay, in dhagaxii ay buurta ka tuureen uu ahaa dhagaxii geeska ama rukunka. Markaasay bilaabeen inay wakhti badan u huraan sidii dhagaxa ay ku soo saari lahaayeen mar

kale buurta.

Haddaba dhibkii iyo qaxarkii ka qabsaday dhagaxii la diiday ayaa aayaddan sideedaadi inoo farisaysaa ama macnaynaysaa. Dhagaxii la diiday wuxuu iyagii ku noqday mid ka hor-joogsada shaqadoodii, oo wuxuu rasuulku leeyahay sida ku qoran aayaddi sideedaad, **"Iyo Dhagax lagu turunturroodo oo ah dhadhaab lagu xumaado; waayo, waxay ku turuturroodaan hadalka, maxaa yeelay, ma addeecsana; taas oo ah wixii loo xugmay."**

Haddaba wuxuu rasuulku inoo sheegay, isagoo soo xiganaya qorniinka, in dhagixii kuwa wax dhisaa diideen, uu noqday madaxa rukunka. Dhagaxaas laga hadlayo waxaa weeye, dabcan ama uu matalayaa ama u taagan yahay, Masiixa. Markii uu dunida yimid waxaa isaga diiday "kuwiisii, oo waxaa Injiillada laynoogu sheegayaa, **"Inuu u yimid kuwiisii, oo kuwiisiina ay diideen ama ayan aqbalin."**

Markaas maahan in la diiday oo keliya, ha yeeshee aniga iyo adigaba waxaynu haatan ku nool nahay duni Masiixa neceb. Weliba inkastoo aynu ku dhow nahay marka Masiixa dhalashadiisa loo dabbaal-dego, ayaa qaramma badan oo dhalashada Masiixa looga dabbaal-dego ama laga xuso, ayaa haddana Masiia laga neceb yahay.

Waxaad markaas la yaabaysaa in la diido mid si weyn dunida looga xuso! Saaxiib Sayid Ciise Masiix wuxuu maanta adiga kuu yahay sida dhagax lagu turunturrooda ama sallax lagu xumaado. Haddii aad ku dul dhacdo oo aad jajabto isaga ayaa ku qaadanaya, oo waxaad baranaysaa inaad ku kalsoonaato, si adiga qudhaaduba aad u adkaato.

Waxaad noqonaysaa kakane, ama ma jabe, waayo waxa aasaas kuu noqonaya Masiixii sara-kacay. Miyaanay taasu wax aad iyo aad u wanaagsan kuu noqo-naynin. Si kastoo adiga uu kuu yahay saaxiib, aniga waa Masiixayga, oo waan ku kalsoonahay.

Waxaanan helay adadaygga, **"Waayo aniga iyo masiixyiinta kaleba, laynaguma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laynagu dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo Wara."** Saaxiib warkaasu ma ku anfacay, mise waxbaa kuu laaban? Habeenka xiga ayaannu waxbaridda iyo qalbi-qaboojinka rasuul Butros halkii ka sii wadi doonnaa.

**SONG: REEL----CUT------**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad

maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin